



HEALTHCARE SAFETY
INVESTIGATION BRANCH

SOMALI

KU SAABSAN HSIB

Annagoo hawlgalnna tan iyo maalintii 1 Abriil 2017, waxaan baaritaanno madaxbannaan ka qabannaa dhammaan adeegga NHS (Adeegga Caafimaadka Qaran) ee England iyadoo ay ujeeddadu tahay in la hoggaamiyo wanaajinta heerka qaran.

Waxaan marti u nahay Wanaajinta adeegga NHS (NHS Improvement) waxaanan maalgelin ka helnaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulsheed (Department of Health and Social Care); hase yeeshee waxaan wax u qabannaa si ka madaxbannaan ururrada isbitaal iyo ururrada kale ee adeegga NHS.

WAR DHEERAAD AH HEL

Bartayada internetka ayaa haysa macluumaad guud oo dheeraad ah oo annaga nagu saabsan, iyo weliba qayb u go'an baaritaannada dhalnada.

WWW.HSIB.ORG.UK

 [@hsib_org](https://twitter.com/hsib_org)



HEALTHCARE SAFETY
INVESTIGATION BRANCH

MACLUUMAADKA KU SAABSAN SOO GUDBINTAADA HSIB

Waxaa soo gudbin loo soo diray Laanta Baaritaanka Badbaadada Daryeelka caafimaadka (Healthcare Safety Investigation Branch) (HSIB) si aan u qabanno baaritaan.

Waxaan garanaynaa in ay dhici karto in aad ku jirto waqti dhib ah. Baare dhalmo (maternity investigator) ayaa adiga kula soo xiriiri doona shanta maalmood ee shaqo ee xiga gudahood si uu kuugu sharxo cidda aan annagu nahay iyo sababta adiga dhankayaga laguugu soo gudbiyey. Waxaan rabnaa in aan kuugu baaqno waqti aan wada kulanno, goortaasoo aan kaaga jawaabi karno wixii su'aalo ah ee aad ka qabto ururkayaga iyo baaritaanka.

Waxaa muhiim ah in aan baaritaanka bilowno islamarka suurogalka ah. Hase yeeshee, waxaan fahansan nahay in aad u baahan karto waqti dheeraad ah si aad uga go'aan gaarto haddii aad rabto in aad hawsha ka qayb gasho.

WWW.HSIB.ORG.UK

 [@hsib_org](https://twitter.com/hsib_org)